

DUGSIGA MADAXA BANNAAN EE DEGMADA 196
Dugsiyada Dadweynaha Rosemount-Apple Valley-Eagan
Waxbarida, Kobcinta, iyo dhiirigelinta ardaydeena si ay uga gaadhaan nolosha guul waarta

Somali

Lambarka Gaarka u ah **505.3.2P** La-qaatay **Agoosto 1978** Dib wax looga badalay **Julaay 2024**

Cinwaanka **Ogaysiis Dadweyne – Macluumaadka Agaasinka iyo Buugga sannadka**

Ogaysiiska Dadweynaha soo socda waxaa lagu daabici doonaa qaybta sharciga ee wargayska rasmiga ah ee degmada, waxaana lagu soo bandhigayaa boorka warbixinada dugsi kasta ugu danbayn Sebteembar sannad walba waxaana laga heli karaa xaafiyada dugsi. **OGAYSIISKA WAXAA LAGU SHEEGAYAA ...** In Independent School District 196, si waafaqsan Xeerka Xaquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoonaantooda (Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA) iyo Xeerka Ku dhaqanka Xogta ee Dowladda Minnesota, uu shaacinayo in waxyaabaha soo socda ay yihiin "macluumaad agaasin" sida ku cad Xeerka la sheegay, macluumaadkaas ku saabsan ardayduna uu noqon karo mid la shaaciyay haddii macluumaadkaas kamid yahay qaybaha soo socda:

- *Magaca ardayga
- Taariikhda iyo goobta dhalashada
- Qaybaha waxbarashada ugu muhiimsan
- Ka qaybqaadashada yo shaqada howlaha iyo cayaaraha dugsi sida rasmiga ah loo aqoonsan yahay
- Miisaanka iyo dheerarka xubnaha kooxaha cayaaraha
- Taariikhda ka qaybgalka
- Marxaladda isqorista
- *Cinwaanka iimaylka degmadu u samaysay
- Heerka fasalka
- Digriiyada, shahaado sharafeedyada, dibloomooyinka iyo abaalmarinada la helay
- Lambar sharafeedka
- Dugsiga uu dhigto
- Hay'addii ama xaruntii waxbarasho ee ugu danbaysay ee uu dhiganayay
- Sawiraanta iyo bandhigyada kale ee maqalka iyo muuqaalka ah ee loogu tala galay daabacadaha dugsi ogolyahay, buugaagta sannadka, wargaysyada, bandhigyada dadweynaha, astaamaha aqoonsiga ardayga iyo daabacaadda ku saabsan bogogga internetka dugsi ogolyahay
- *Lambarka aqoonsiga ardayga, aqoonsiga isticmaalaha, ama aqoonsiga kale ee qofka ee gaarka ah ee uu ardaygu u isticmaalo galitaanka ama in uu xiriir ku sameeyo hanaanada elektoroonigga ah ama lagu muujiyay calaamadda aqoonsiga ardayga
- **Cinwaanka guriga ardayda fasalka 11aad iyo 12aad iyo lambarka teleefoonka (la siinayo diiwangalinta militariga iyo hay'adaha waxbarashada sare)
- Jadwalka dugsi, diiwaanka imaanshaha maalinlaha ah iyo magacyada waalidka ama masuulka, ciwaanada iimaylka iyo lambarada telefoonada (si loogu sii daayo saraakiisha fulinta sharci)
- Cinwaanka guriga iyo namborada taleefanka (si loogu sii daayo Maktabada Degmada Dakota ujeedooyin bixinta kaadhka maktabadda)

*Waalid/masuulka kama hor istaagi karo shaac ka qaadista magaca ardayga, aqoonsiga ama cinwaanka iimaylka ay degmadu siisay ee fasalka ardayga lagu diiwaangeliyay ama calaamadda ardayga

**Si waafaqsan sharciga, degmadu waa in ay saraakiisha qorista ciidanka qaabilsan ee militariga iyo hay'adaha waxbarashada sare usoo gudbisaa magacyada, ciwaanada guriga iyo lambarada teleefoonka ardayda fasalada 11aad iyo 12aad 60 maalmood gudahood kaddib taariikhda codsiga, in waalidka ama ardayga qaangaadhka ah ilaa uu diido gudbinta macluumaadka.

Macluumaadka tusaha kama mid aha aqoonsashada macluumaadka tilmaamaya diinta, jinsiyadda, midabka, curyaanimada, booska bulshada ama dhalashada. Waalid kasta ama mas'uul kasta oo degmada ku sugan, ama arday kasta oo 18 sano jir ah ama ka weyn, waxa uu degmada ku wargalin karaa in uu diiday gudbinta mid kamid ah ama ka badan oo ah noocyada macluumaadka agaasinka asaga oo la xiriiraya maamulaha dugsi ardaygaas la sheegay uu dhigto sidoo kalena buuxinaya Hanaanka 505.2.4.3P, Diididda Shaacinta Macluumaadka Agaasinka iyo Buugga sannadka. Ogaysiisnaan waa in degmada la siiyaa soddon (30) maalmood gudahood marka ogaysiisnaan la daabaco ama wakhti kasta oo maamulka degmadu ogolaaday. Haddii la xereeyo, diidmada ayaa sii jiraya illaa laga beddelayo ama laga wareejiyo waalidka, mas'uulka ama ardayga u-qalma.

Fadlan faham haddii aad doorato inaad diido sii deynta dhammaan macluumaadka hagaha, ilmahaaga (ama adiga, haddii arday jira 18 sano ama ka weyn) laga saari doono dhukumentiyada sida buugaagta sannadka, liiska sharafta, sii daynta wararka ee ku saabsan guulaha ciyaaraha, sharafyada helay, barnaamijyada tartanka ciyaaraha fudud, tiyaatarka iyo barnaamijyada fanka wanaagsan, barnaamijyada qalin-jabinta, waraaqaha dib-u-ururinta fasalka mustaqbalka, iwm.

INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT 196
/s/Anna Williams, Shaqaalaha Gudida Dugsiga